اللغة الصومالية

Mantinga

# QAACIDOOYINKA AFRTA AH

**Sheekh Maxamed bin Cabdi-Alwahaab**

Alaha u naxariistee

1115 - 1206

Rabwah

المحتـوى الإسـلامـي

Islamhouse.com

# Mantinga QAACIDOOYINKA AFRTA AH

**Sheekh Maxamed bin Cabdi-Alwahaab -Alaha u naxariistee-**

شركاء التنفيذ:

دار الإسلام جمعية الربوة رواد الترجمة المحتوى الإسلامي

يتاح طباعة هذا الإصدار ونشره بأي وسيلة مع الالتزام بالإشارة إلى المصدر وعدم التغيير في النص.

Telephone: +966114454900
ceo@rabwah.sa
P.O.BOX: 29465
RIYADH: 11557
www.islamhouse.com

# Mantinga QAACIDOOYINKA AFRTA AH

**Sheekh Maxamed bin Cabdi-Alwahaab -Alaha u naxariistee-**

Magaca Allaah ayaan ku bilaabay Naxariista guud ku sifaysnaa (bi macnaa u naxariista khalqigiisa dhamaan Muslimiin iyo Gaalaba, Dad iyo Duunyaba) Naxariista gaarkana ku sufaysnaa (bi macnaa Mu'miniinta si gaar ah ugu naxariista Maalinta Aakhiro).

Waxaan waydiisanayaa Allaaha Sharafta badan Deeqsiga ahaaday, Allaaha ahaaday Rabiga Carshiga Wayn, inuu kuu gar gaaro, (ku ilaalsho, kuu hiiliyo) Aduunka iyo Aakhirada (ayaan Allaah kaaga bar yayaa).

Iyo inuu kaa dhigo mid barakaysan meel kasto aad joogtid, iyo inuu kaayeelo kuwa hadii la siiyo shukriya, hadii la imtixaamana sabra, hadii uu dambaanana dambi dhaaf waydiista,

Sedexdaasi waa Cinwaanka Liibaanta.

Ogoow Allaah ha kugu hanuuniyo daacadiisee (Daacadu = waa inaad la timaado wuxuu ku faray wuxuu kuu diidayna aad ka dheeraato),

Ogowna in xanafiyah tahay Millada ( ibraahim) scw.

Ogowna in xanafiyah tahay Millada ( ibraahim) scw. Taasi oo ah inaad caabudo Allaah kaligiisa

Weliba adigoo u gaar yeelaya diinta/cibadada (ilaahay), siduu Allaah koreeyey yiri:

﴿وَمَا خَلَقْتُ الْجِنَّ وَالإِنسَ إِلاَّ لِيَعْبُدُونِ﴾[الذاريات: 56]

((Uma abuurin Jinka iyo Insaanka waxaan Cibaadadayda (keliyeyntayda) ahayn)) suuratu ad-daariyaat, aayada 56aad:

Hadaad garatay Inuu Allaah kuu abuuray Cibaadadiisa,Ogoow inaan Cibaadadaa aanan lagu magacaabaynin Cibaado, illaa iyadoo kaliyeen la socoto mooyaanee ( Allaah loo keli yeelo), Sidaan Salaadaba aan loogu magacaabaynin Salaad illaa ay Dahaaro la socoto mooyaanee.

Hadii uu galo Shirkiga Cibaadada way fasaaday (Cibaadada) Sida wayso Jabiyaha hadii uu galo daharada (waysada u burayso) hadaad gartay in hadii shirkiga uu dhex galo cibaadada uu fasahaadiyo, uunbaa buriyo camalka, kuwa ku waaraya naarta.

Waxaad ogaatay waxa ugu muhiimsan ee ku saaran garashada arinkaasi aad garatay, waxaana la arkaa inuu Allaah kaa saaro dabinka (dabinka shirkiga), kaas oo ah wadaajinta Allaah, waxana uu Alaah ka yiri:

﴿إِنَّ اللّهَ لاَ يَغْفِرُ أَن يُشْرَكَ بِهِ وَيَغْفِرُ مَادُونَ ذَلِكَ لِمَن يَشَاءُ﴾ [النساء: 116].

Allaah ma dhaafo in wax lala wadaajiyo (shariik loo yeelo) Wuuse u dhaafaa wixii intaasi (Shirkiga) ka soo hadhay Ciduu doono. Al-Nisaa, aayada 116

Arinkaasina waa garashada afarta Qaacido ee uu Allaah ku sheegay kitaabkiisa.

## Qaacidada Koowaad

Waa inaad ogaatid in Gaaladii uu la diriray (dagaalay) Rasuulka scw, ay ahaayeen kuwo qirsan in uu Allaah SW, Abuure, Maamule (wax walba abuuray ee maamula), Taasi se ma soo galinin Islaamka, Daliilkana waa Qawlkiisa Sareeyey:

﴿قُلْ مَن يَرْزُقُكُم مِّنَ السَّمَاءِ وَالأَرْضِ أَمَّن يَمْلِكُ السَّمْعَ والأَبْصَارَ وَمَن يُخْرِجُ الْحَيَّ مِنَ الْمَيِّتِ وَيُخْرِجُ الْمَيَّتَ مِنَ الْحَيِّ وَمَن يُدَبِّرُ الأَمْرَ فَسَيَقُولُونَ اللّهُ فَقُلْ أَفَلاَ تَتَّقُونَ﴾ [يونس: 31].

waxaad dhahdaa yaa idinka arsaaqa Samada iyo Dhulka yaana hanta maqalka iyo aragyaalka yaana ka soo bixiya waxa nool waxa dhintay kana soo bixiya waxa dhintay waxa nool yaana yaana maamula Arinka waxay ku leeyihiin Allaah waxaad dhahdaa miyaydan (Allaah) ka cabsanayn (footnotereference)

Suuratu Yuunis aayada 31 aad

## Qaacidada Labaad

Inay leeyihiin

Ma aanan baryin ugumana jeesanin xagooda (Cibaadada Sanamyada) waxaan ka hayn doonis aan ka doonayno u dhawaasho iyo Shafaacad (aan Allaah ugu dhawaano).

﴿وَالَّذِينَ اتَّخَذُوا مِن دُونِهِ أَوْلِيَاء مَا نَعْبُدُهُمْ إِلاَّ لِيُقَرِّبُونَا إِلَى اللَّهِ زُلْفَى إِنَّ اللَّهَ يَحْكُمُ بَيْنَهُمْ فِي مَا هُمْ فِيهِ يَخْتَلِفُونَ إِنَّ اللَّهَ لاَ يَهْدِي مَنْ هُوَ كَاذِبٌ كَفَّارٌ﴾[الزمر: 3].

{kuwa samaystay Allaah sokadiisa Awliyo (gargaartayaal) waxay leeyihiin uma caabudayno (sanamyada) Ilaa inay noo dhawaynayaan Allaah mooyaane, Ilaahay ayaa kala xukumi doonaa wixii ay isku khilaafeen Allaah ma hanuuniyo cid been badan gaalnimo badan}

Daliilka shafeecadana waa Qawlkiisa Sareeyey:

﴿وَيَعْبُدُونَ مِن دُونِ اللّهِ مَا لاَ يَضُرُّهُمْ وَلاَ يَنفَعُهُمْ وَيَقُولُونَ هَؤُلاء شُفَعَاؤُنَا عِندَ اللّهِ﴾ [يونس:18].

{Waxay caabudayaan Ilaahay sokadiisa wax aan waxba u dhibaynin (hadii ay iska dhaafaan caabudistiisa wax dhib ah kuma samayn karo) waxna u taraynin (hadii ay caabudaan) waxayna leeyihiin kuwaasi waa kuwa nooga shafeecaya ilaahay agtiisa}

Al-zumr aayada {yuunis:18}

Shafeecadana waa labo shafeecadood (2 ayay u qaybsantaa)

Shafeeco la diiday, Iyo shafeeco la sugay

Shafaacada la diiday waa

Waa mida laga dalbado (waydiisto) Cid aan Allaah ahayn wax uusan awoodin Allaah mooyaanee

﴿يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُواْ أَنفِقُواْ مِمَّا رَزَقْنَاكُم مِّن قَبْلِ أَن يَأْتِيَ يَوْمٌ لاَّ بَيْعٌ فِيهِ وَلاَ خُلَّةٌ وَلاَ شَفَاعَةٌ وَالْكَافِرُونَ هُمُ الظَّالِمُونَ﴾ [البقرة:254].

kuwa (xaqa) rumeeyow nafaqeeya (bixiya) waxaan idinku arzaaqnay qaarkood ka hor Imaatinka maalin (Qiyaamada) oon gadasho jirin iyo saaxiibtinimo iyo shafeeco (midna) Gaaladuna iyaga uunbaa daalimiin ah.

Albaqarah, aayada {254}

Shafeecada la sugayna :

Waa mida laga dalbo Allaah, kani shafeecayaana waa mid lagu sharfay shafeecada, kani loo shafeecayaana waa qof uu Allaah ka raali noqday qawlkiisa iyo camalkiisa ogolaansho ka bacdi, siduu Allaah sareeyay yidhi:

﴿مَن ذَا الَّذِي يَشْفَعُ عِنْدَهُ إِلاَّ بِإِذْنِهِ﴾ [البقرة: 255].

Waa kuma kan ka shafeecaayo Allaah agtiisa inuu Allaah uu u ogolaado mooyee (footnotereference)

Albaqarah aayada 255

## Qaacidada Sadexaad

Nabiga scw waxa laga soo saaray dad ku kala tagsan cibaadadooda ( oo waxyaabo kala duwan caabudi jiray) waxa ka mid ahaa kuwo malaa'igta caabuda, kuwo anbiyada iyo saalixiinta caabuda, kuwo caabuda geedaha iyo dhagaxaanta, kuwo caabuda qoraxda iyo dayaxa, dhamaantoodna kama ogolaan ee wuu kula dagaalamay, mana kala saarin, daliilkana waa qawlkiisa sareeyay:

﴿وَقَاتِلُوهُمْ حَتَّى لاَ تَكُونَ فِتْنَةٌ وَيَكُونَ الدِّينُ كُلُّهُ لِلّه﴾ [الأنفال: 39].

La dagaalama gaalada ilaa aysan ka ahaanin fitno (shirki iyo gaalnimo) diinta dhamaantiisna ahaanayso mid u gaara Allaah (footnotereference)

Alanfaal: aayada {39}

Daliilka Qoraxda iyo Dayaxana waa qawlkiisa koreeye:

﴿وَمِنْ آيَاتِهِ اللَّيْلُ وَالنَّهَارُ وَالشَّمْسُ وَالْقَمَرُ لاَ تَسْجُدُوا لِلشَّمْسِ وَلاَ لِلْقَمَرِ وَاسْجُدُوا لِلَّهِ الَّذِي خَلَقَهُنَّ إِن كُنتُمْ إِيَّاهُ تَعْبُدُونَ﴾ [فصلت: 37].

Aayaatka Ilaahay waxaa ka mid ah Habeenka iyo Maalinta iyo qoraxda iyo dayaxa ha u sujuudina qoraxda iyo dayaxa midna ee u sujuuda Ilaahii iyaga abuuray hadii aad tihiin kuwo isaga kaligiis caabudayo (footnotereference) Fussilat {37}

Daliilka malaa'iktana waa Qawlkiisa Sareeyey:

﴿وَلاَ يَأْمُرَكُمْ أَن تَتَّخِذُواْ الْمَلاَئِكَةَ وَالنَّبِيِّيْنَ أَرْبَاباً...﴾ الآية [آل عمران: 80].

Mana idin amraayo (Allaah) inaad ka yeelataan Malaa,igta iyo Nabiyada Rabiyaal

Aayada

Daliilka Anbiyadana waa Qawlkiisa Sareeyey:

﴿وَإِذْ قَالَ اللّهُ يَا عِيسَى ابْنَ مَرْيَمَ ءَأَنتَ قُلتَ لِلنَّاسِ اتَّخِذُونِي وَأُمِّيَ إِلَهَيْنِ مِن دُونِ اللّهِ قَالَ سُبْحَانَكَ مَايَكُونُ لِي أَنْ أَقُولَ مَا لَيْسَ لِي بِحَقٍّ إِنْ كُنْتُ قُلْتُهُ فَقَدْ عَلِمْتَهُ تَعْلَمُ مَا فِي نَفْسِي وَلَا أَعْلَمُ مَا فِي نَفْسِكَ إِنَّكَ أَنْتَ عَلَّامُ الْغُيُوبِ﴾ الآية [المائدة: 116].

{(Xusuuso) Markuu Yidhi Eebe, Ciise binu Maryamow Ma adaa ku Yidhi Dadka ka Yeesha ani iyo Hooyaday Ilaahyo Eebe ka sokow, uuna Yidhi waad Nasahantahay Iguma Haboona inaan Dhaho Waxaanan Xaq u lahayn, Haddaan idhina waad ogtahay, waxaadna Ogtahay waxa Naftayda ku sugan Anuguse kuma Ogi Adiga unbaa ah kan waxa Maqan og} aayada:

Almaa'idah aayada 116

Daliilka Saalixiinta waa Qawlkiisa Sareeyey:

﴿أُولَئِكَ الَّذِينَ يَدْعُونَ يَبْتَغُونَ إِلَى رَبِّهِمُ الْوَسِيلَةَ أَيُّهُمْ أَقْرَبُ وَيَرْجُونَ رَحْمَتَهُ وَيَخَافُونَ عَذَابَهُ...﴾ الآية [الإسراء: 57].

{Kuwaasi (Gaalada ahu) kuwa ay baryayaan (caabudayaan) waa Kuwo doonaya ( iyaga laftoodu) in ay rabigood u dhawaadaan, Kooda ugu dhaw ayaa dalbaayo

(xaga ilaahay in uu u dhawaado) Waxayna rajaynayaan Naxariistiisa (eebe), Waxayna ka baqanayaan Cadaabtiis}.

Aayada Al-israa 57

Daliilka geedaha iyo dhagaxaanta waa Qawlkiisa Sareeyey:

﴿أَفَرَأَيْتُمُ اللاَّتَ وَالْعُزَّى * وَمَنَاةَ الثَّالِثَةَ الأُخْرَى﴾ [النجم: 91، 20].

{Ka warama (Sanamyada) Laata iyo Cuzaa Iyo Manaatadii sedexaad ee kale

An-najmi 91,20

iyo xadiithka uu wariyay Abii Waaqid Allaysi_ Allaha ka raali noqdee_ wuxu yidhi

Waxaan ula baxnay Nabiga scw – Xunayni xageeda (waa meel xunayn lagu magacaabo) Anagoo ay nagu cusubtahay xiligii aan Gaalnimada ka nimid (dhawaan soo Islaamnay), Mushrikiintana waxay lahaayeen geed gob ah Ay agteeda ictikaafaan (ag fadhiyi jireen) Waxayna suranayeen geedka Hubkooda, Waxaana geedkaasu la dhahaa mid wax la surto (laga lulo) Waxaan soo marnay geed gob ah waxaana dhahnay

Rasuulkii Allaaw noo yeel (noo sameey) Mid wax la surto (sida geedkaan oo kale noo sameey) Siday ayaga u leeyihiin mid ay wax surtaan. (sababta ay u waydiinayaan Rasuulka scw inuu u sameeyana waxay tahay Mushrikiintii

ayaa waxay ictiqaadsanaayeen in seeftii geedlaasi la suro ay guul keenayso, kuwa dhawaan soo islaamayna sidaasi ayay u dhaheen noo sameey geedkan oo kale).

Alxdadiith...

waxa wariyay Imaam Axmed iyo tirmidi, oo yiri:

waa xadiis Xasan ah oo saxiix ah, Almanaawi waxa uu yiri:

xadiiska sanadkiisu waa sax,waxaana sexeexay Albaani

## Qaacidada afaraad

Mushrikiinta (kuwa shirkiga ku jira) waqtin aan joogno, Way ka shirki adag yihiin (daran yihiin) kuwii hore, Sababtana waxay tahay kuwii hore waxay Allaah u shariig yeeli jireen waqtiga barwaaqada (oo keliya), Wayna u gaar yeeli jireen (Cibaadada Allaah) marka ay (xaalada) ku adkaato ( xiliga dhibaatada), Mushrikiinta waqtigeena joogtana Shirkigooda waa mar kasta xiliga barwaaqada iyo xiliga dhibaatada Waxaana u daliil ah qayl Alle:

﴿فَإِذَا رَكِبُوا فِي الْفُلْكِ دَعَوُا اللَّهَ مُخْلِصِينَ لَهُ الدِّينَ فَلَمَّا نَجَّاهُمْ إِلَى الْبَرِّ إِذَا هُمْ يُشْرِكُونَ﴾ [العنكبوت: 65].

{Markay fuulaan Doonta Waxay baryaan Allaah weliba ayagoo u gaar yeelaya Allaah Diinta (Cibaadada) Markuu Allaah u soo bad baadiyana Banaanka (ee ay bada ay ka soo baxaan), Markaasi ayay u shariik yeelayeen}

Al-Cankabuut 65

Alle Ayaa og (wax walba), Naxariis /Amaan iyo Nabad galyo ha ahaato Nabi Muxammed korkiisa iyo Ahalkiisa iyo Asaxaabtiisa

****

# Index

Mantinga QAACIDOOYINKA AFRTA AH............................. 3

Qaacidada Koowaad.................................................... 5

Qaacidada Labaad...................................................... 5

Qaacidada Sadexaad.................................................... 8

Qaacidada afaraad..................................................... 11

Index...................................................................... 13

ننشر الإسلام بأكثر من 100 لغة

موسوعة القرآن الكريم
QuranEnc.com
موسوعة تضم تفاسير وتراجم موثوقة لمعاني القرآن الكريم

موسوعة الأحاديث النبوية
HadeethEnc.com
موسوعة تضم ترجمات للأحاديث النبويـــة وشروحها بعدة لغـــات

موسوعة المصطلحات الإسلامية
TerminologyEnc.com
موسوعة تضم ترجمات المصطلحات الإسلاميـــة وشروحها بعدة لغـــات

منتقى المحتوى الإسلامي
موسوعة تضم المنتقى من المحتوى الإسلامي باللغات

IslamHouse.com
مرجعيـــة مجانيـــة إلكترونية موثوقة للتعريف بالإســـلام

جـمـعـيـة الـدعـوة وتوعية الجاليات بالربوة

جمعية خدمة المحتوى الإســلامــي باللـغـــات


القواعد الأربع